

Waa maxay TAVIS ?

Tabaabushaha Dhexgalka ee ka Hortagga cabsigelinta ee Toronto

(TAVIS) waa hawlgal degdeg ah, yaraynayaa cabsigelinta, ahna mujtamac abaabul iyo diyaarin kuna aaaddan kordhinta badbaada Xaafadaha Toronto. Hawlgalkan, waxaa loo qorshaynayaa sarakiiil badan oo Booliis ah aagaga ay la deristay adayg la xiriira cabsida. TAVIS waxaa hormuud u ah Adeegga Booliiska ee Toronto (Toronto Police Services), Maqaalada Toronto (City of Toronto), Gudida Iskuulada ee Degmada Toronto (Toronto District School Board) iyo dhawr urur mujtamaceedyo.



Waa maxay Hawlgalka Albion-Finch TAVIS?

Xilligan kulaylaha, mujtamaca Albion-Finch waxay helidoonaan sa Raakiil booliis ah oo dheeraad ah loona qoondeeyey aagga. Mid kasta oo ka mid ah saraakiishaas ad-adag oo waaya aragga ahi, waxay socod iyo ushuleetiyaal ku marayaan aagga oo dhan:

- Si ay u dhexgalaan ugan hortagaan cabsida
- Iyaguna ay is baraan dadka ku nool xaafadda iyo kuwa baayacmushtarka ahba
- Waxay kala qaybgelayaan munaasabadaaha xaafadda
- Waxay ballaadinayaan xidhiidhkooda hadda jira iyo iskaashigooda, isla markaasna abuurayaan kuwa cusub
- Way u gudbinayaan mujtamaca macluumaad ku saabsan TAVIS
- Waxay la shaqaynayaan muwaadiniinta, iyo magaalada Toronto si ay u abaabulaan mujtamaca iyadoo hadafkoodu yahay inay abuuraan xaafado nabad ah oo wax yar uun kaga tashada ku tiirsanaanta magaalada iyo caawimooyinka Booliiska



united for safer neighbourhoods



Toronto Community Housing



Qaar ka mid ah hawla la xiriira TAVIS

Cayaaro – kubadda cagta, kubadda kolayga, iyo kuwo kiae oo lagu cayaaro garoomada furan.

Moasraxiyado dhallinyaro – saraakiisha TAVIS waxay tegayaan dugsiyada sare si ay ugu bandhigaan masraxiyado TAVIS oo ku saabsan dhallinyarada

Hawlo Denbi joojineed – Baro mujtamaceedyo, sida meelo looga baahanyahay iftiin dheeraad ah ama aagga hawd noqday oo loo bahanyahay in geedaha laga yareeyo, awood saaristaas oo dahn oo looga jeedo in la kordhiyo badbaadada

Mashruuc Qurxineed – bar ku taalla aagga Albion-Finch ayaa loo cayimayaa deegaan qurxinta.

Dicayad baabi'n- deganayaasha, Booliiska iyo kaashadayaasha magaalada ayaa waxay ka wada shaqaynayaan in soo ogaadaan isla markaasna ka baabiyaan wixii dicaayado ka muuqda xafadaha.



tpslinks.ca

Isu diiwaan geli telefoonada la xiriira Booliiska iyo farrimaha feejignaanta



Sidee Baan Uga Qaybqaadankaraa?


Adeegga Booliiska ee Toronto, Magaalada Toronto, iyo kuwo kale oo ka mid ah ka qaybqaatayaasha TAVIS ayaa waxay ku adagyihiin inay deegaankiinna ka dhigaan mid badbaadsan, **laakiin keligayo ma samaynkarno**. Muwaadiniinta, kooxaha mujtamaca iyo dadka baayacmushtarka ah waxaa lagu dhiirri gelinayaa inay la xiriiraan Xafiiska Warcelinta Mujtamaca ee saldhigga Booliiska ee 23aad si ay u eegaan sida ay uga qaybqaadaan karaan barnaamijkan.

Saldhigga 23aad
Unugga Warcelinta Mujtamaca
Adeegga Booliiska ee Toronto
 Telefoon (416) 808-2319



HAWLGALKA ALBION-FINCH

Tabaabushaha Dhexgalka ee Ka Hortagga Cabsigelinta ee Toronto



united for safer neighbourhoods



HAWLGALKA ALBION-FINCH

Somali translated version
torontopolice.on.ca/tavis
twitter.com/tavis_tps

Mashruucan waxaa suurto geliyey dhaqaale ay bixisay Badbaadada Mujtamaca iyo Adeegga Sixitaanka ee Minis Try.

